# Maxaad Dooneysaa Inaad Ka Ogaato Dacaayadaha Marin Habaabiska Ah

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| ADacaayadaha marin habaabiska iyo been abuurka ah | 1 |
| Waxa aan sameynay si aan ula dagaallanno xayaysiinta marin habaabinta | 2 |
| Maxaad yeeleysaa haddii aad hesho macluumaad marin habaabis ah oo ku saabsan Lambarka Bulshada | 2 |
| Maxaad yeeleysaa haddii aad hesho macluumaad marin habaabis ah oo ku saabsan Lambarka Bulshada | 2 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 2 |


## ADacaayadaha marin habaabiska iyo been abuurka ah

Guud ahaan waxaa inta badan dhib ka soo gaaraa  dadweynaha dacaayado marin habaabis ah oo isticmaala Lambarka Bulshada iyo Medicare.  Inta badan, shirkadahaas waxa ay qabashada adeeggaasdadka ku weydiistaan lacag, iyada oo isla adeegaas aad si toos ah uga heli karto maamulka Lambarka Bulshada lacag la'aan.

Adeegyadaas waxaa ka mid ah helitaanka:

- Kaarka saxa ah ee Lambarka Bulshada ee haweenka guusada oo bedela magacooda;
- Kaarka Lambarka Bulshada ee aad ku bedeleyso mid kaa lumay.
- Warbixinta Lambarka Bulshada; iyo
- Lambarka Bulshada ee caruurta.

Qaar ka mid ah dacaayadahaas waxa auy sheegtaan in xaaladda dhaqaalaha ee Lambarka Bulshadauu xun yahay dadkuna ay khatar ugu jiraan in ay waayaan macaashka ay ka helaan Lambarka Bulshada ama Medicare haddii aanay lacag ku bixin xuibinimadooda. Shirkadaha qaarkood waxa muuqaal aan sx aheyn ay ka bixiyaan Lambarka Bulshada iyo hay'adaha la shaqeeya iyaga soo saara «warbixino la xiriira Lambarka Bulshada» ama daabacaad ku saabsan macaashka. Sida caadiga ah, shirkadani waxa ay ururiyaan macluumaadka macaamiisha oo ay dib u sii iibiyaan macluumaadka gaara ah ee

macaamiishooda. Dacaayadaha noocaas ah waa mid marin habaain iyo khiyaano ku ah dadweynaha Mareykanka.

## Waxa aan sameynay si aan ula dagaallanno xayaysiinta marin habaabinta

Sharciyada ku wajahan marin habaabiska ku saabsan Lambarka Bulshada iyo Medicare waxa ay dadweynaha iyo hay'adaha gaarka ka mamnuuayaan in ay adeegsadaaan erayo ama waxyaabo marin habaabis ah. Dayaacadaha ay soo bandhigaan ma aha kuwa ay dadku ku aaminayaan in ay wakiilo ka yihiin ama ka scodaan ama ay ogolaasho ka heystaan Lambarka Bulshada ama xarumaha Medicare ama aeedgga Medicaid (Medicare).

Haddii ay dhacdo in dacaayadaha noqdaan kuwo marin habaabin la taaban karo sheegaya dambi baaraha qaranka iyo Lambarka Bulshada ayaa wada eega dacaayadda. Marka su'aalo laga weydiiyo mulkiilayaasha dacaayadda iyo shrkadaha waxa ay iyaga oo aanay cidina kuq asbin joojiyaan adeegsiga ama bedelaan dacaayadda si ay ugu hogaansamaan sharciga. Hase yeeshee, haddii aan la gaari karin heshiis aanay cidina ku qasbin, xafiiska dambi baaraha guud ayaa ganaax u dira qorka ama shirkadda sharciga jabisay kaasoo gaaraya ilaa 5,000 halkii mar oo dacaayadda la dirayba. Dacaayadaha marin habaabinta ee ku jeeda Medicare waa in lala soo socodsiiyaa dambibaaraha guud ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Dadweynaha si ay u eegaan.

## Maxaad yeeleysaa haddii aad hesho macluumaad marin habaabis ah oo ku saabsan Lambarka Bulshada

Qoraalka oo dhan u soo dir, oo ay ku jirto baqshaddii lagu soo diray:

Office of the Inspector General
Fraud Hotline
Social Security Administration
P.O. Box 17768
Baltimore, MD 21235

Sidoo kale, la socodsii xeer ilaalinta gobolka or xafiiska arrimaha macaamiisha iyo waaxda ganacsiga ee "Better Business Bureau" ee degaankaaga.

## Maxaad yeeleysaa haddii aad hesho macluumaad marin habaabis ah oo ku saabsan Lambarka Bulshada

La xiriir Xafiiska Qareenka Guud ee Waaxda Adeegga Caafimaadka iyo Dadweynaha

U.S. Department of Health & Human Services
Office of Inspector General
Attn: HHS Tips Hotline
P.O. Box 23489
Washington, DC 20026

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;

*(rogad)*

- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10005-SO | May 2017
Maxaad Dooneysaa Inaad Ka Ogaato Dacaayadaha Marin Habaabiska Ah
What You Need To Know About Misleading Advertising (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha